


**November 2016 Newsletter**

## Tusmada

* Mar Kale iyo Roobabkii oo Baaqday
* Dhir-Barasho
* Somaliland: Keymihii Fooxa oo Halis ku Jira.
* Deeqaha
* Xarunta Keydka Kal-Duwanaanshaha Noolaha oo Bilawday Howlaheedii
* Qurxinta iyo Dhiraynta Jaamacadda Hargeysa
* Wararka Xarunta Kala-Duwanaanshaha Noolaha



# Mar Kale iyo Roobabkii oo Baaqday

Geeska Afrika waxa mar kale ku habsatay abaar daran. Gu'gii iyo Deyrtii (2016) labaduba sidii la arki jiray uma ay di'in, meelaha qaar waa baaqdeen, meelaha qaarkoodna suququl ayay ku ahaayeen. Abaartanina waxa ay daba socotaa dhowr sannadood oo roob yaraani jirtay, isla markaana ay wehelisay xaaluf deegaan oo baahsani. Saansaanka abaareed saamayn daran ayay ku yeelatay xoolo-dhaqatadii iyo beeraleydiiba. Keliya Somaliland, reero lagu hilaadin karo tiradooda 300,000 oo qoys ayaa u ban dhigan xaalado daran oo cidhiidhi maciishadeed, una baahan gargaar degdeg ah. Meelaha si xun ugu saamaysmay abaaraha waxa ka mid ah gobollada Sanaag, Togdheer iyo Sool.

Darnaanta abaarta abaarta waxa ka dhashay guurguur iyo dool xooggan oo ay xoolodhaqatadu isaga gudbeen gobollo – iyaga oo adeegsanaya gaadiid. Dadkii ay xooluhu ka baxeen waxa ay dantu ka riixday in ay u guuraan tuulooyinka iyo magaalooyinka, kuna biiraan saboolka magaalo. Tuulooyinka hadda waxa ay degaan u noqdeen dadka da'da ah, bukaanka, iyo kuwa kale ee nugul ee aan raaci karayn reerahoodii.

Gu'yaal badan oo xaalufin deegaan ayaa xoojisay darnida abaarta sannadkan. Dhuxuleysiga ayaa dhaliyay dhibaatada ugu badan. Tuulaynta tirada badan, samaynta goobo biyood oo ee aan qorshaysnayn iyo is-beddelka ku yimid guurguurkii ku salaysnaa xilliyada ayaa qayb ka ah dhibaatooyinkaas. Xaalufku waxa uu sidoo kale dhaliyay ciidguur buuxiya meelihii biyaha lagu keydsanayay – taasina ay ka qayb qaadato biyo-yaraanta.



Abaaraha is-daba joogaa waxa ay raad taban ku yeesheen kala-duwanaanshiiyihii noolaha – tiroahaan iyo tayo-ahaanba. Xal-raadinta amminta dheer ee dhibaatada abaarahu waxa ka mid noqon doona dib-u-soo-nooleynta kala-duwanaanshahaas noole – dhir iyo xawayaanba. Dhirta xero-dhaladka ahi waxa ay la qabsadeen cimilada qarfo-u-ekaha ah, se abaaruhu si xooggan ayaa ay u nugleeyaan, ugu dambaynna waxa ay soo dedejiyaan dhimashadooda. Hoos-u-dhaca kala-duwanaanshaha daaq, waxa ka dhasha culays fuula dhiroonka soo hadha. Dib-u-soo-nooleynta ciidda, oo ay kaalin xooggan ka qaadaataan dhiroonku, iyo weliba nooleyaasha ku dhex nool ciidda ee ili-ma-aragtayda ah sida cayayaanka iyo *microbes/fungi* ayaa u baahan waxqabad xooggan. Hay'adda Somaliland Biodiversity Foundation waxa ay diyaar u tahay in ay gacan ka geysato dhinacyadaas.

*Images© Candlelight for Environment, Health and Education*


## Dhir-Barasho

***Finka-dhijis (Lasiosiphon somalensis var. somalensis)***

Geed-gaabkan waxa inta badan lagu arkaa dhulka buuraleyda ah. Daaqitaanka xoolaha uma dhadhan wanaagsana, waxana la arkaa isaga oo ubaxaysan xilli abaareed iyo xilli doogba. Dhererkiisu waxa uu gaadhaa 80 cm. Waxa uu noqon kartaa geed-ubaxeed la soo xero gashan karo oo guryaha iyo magaalooyinka lagu qurxin karo. Dawo-dhaqameed ahaan, waxa loo adeegsan jiray la-tacaalidda qaaxda. Se xogta adeegsigiisa dawo-ahaaneed waa kooban tahay.

http://openherbarium.org/taxa/index.php?taxon=330852

## Somaliland: Keymihii Fooxa iyo Dhibaato Hor Leh oo soo Food Saartay





Bishii Oktoobar (2016), **Dr. Anjanette DeCarlo**, oo xubin ka ah guddida sare ee Somaliland Biodiversity Foundation, **Stephen Johnson** oo isna ah hawl-wadeenka dhinaca sayniska ee hay'adda, iyo **Axmed Diiriye Cilmi** oo ah dhir-dhowre (*forester*) ayaa booqday buuraleyda Daalo, ee gobolka Sanaag – si ay u soo sahamiyaan saansaanka ku xeeran dhirta Moxorka iyo Yagcarka ee laga helo Beeyada iyo Meeyddiga (*Boswellia carterii*, *B. frereana*) iyo qaab-adeegsiga dhirta ee ku aaddan joogtaynta dhaqaalaha laga helo.

Muuqaallada iyo xogaha soo baxay aad bey u murugo badan yihiin. Dhirtii beeyada iyo mayddiga ayaa si ka badan xamilkoodii xabag looga 'maalayaa' – iyaga oo geed kasta nagfid (sarid) aad uga badan intii ku habboonayd la nagfayo – taas oo xoog uga duwan qaab-dhaqameedkii ku salaysnaa dhowridda iyo nasinta dhirta. Weliba dhirta qaar ayaa la qolof riday ama la diirtay. Markaas yaab ma laha in la arko dhir badan oo dhaqso u dhimanaysa.

Xijiyeysatada iyo guud-ahaan cidda dhirta sheegataaba aad ayay u werwersan yihiin. Odey-dhaqameedyada ayaa muujiyay rabitaankooda in ay wax ka qabtaan arrinkan u muuqda in uu faraha ka sii baxayo. Haba yaraatee ma ji-raan wax shuruuc ah – mid degaan iyo mid daltoona - oo u dejisan ganacsigan. Dadka ku tiirsan dhaqaalahani waxa ay dareensan yihiin in iyaga iyo xaaladahan ay dawladda dhexe u kala baxday. Waxa se jirtaa dhaqaale yari – haddiiba ay dawladdu wax ka qaban lahayd maaraynta iyo xakamaynteedaba.



Iyada oo gurashada iyo goosashada xabkuhu qayb ka tahay dhaqanka soo-jireenka ah ee Soomaalida, ayaa Dr. Anjanette lagu marti geliyay in ay war-bixin la xidhiidha mawduucan ku soo ban dhigto Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa. Waxana ka soo qayb galay dad door ah oo ay ku jireen qaar ka ganacsada xabkaha. Soo-ban-dhigiddaas waxa laga daawan karaa Youtube-ka. Waxana lagu raadin karaa *Analysis of Resin Economy in Somaliland*. Ugu dambayntii waxa meesha laga soo jeedisay talooyin ku saabsan sidii ganacsiga xabkahaasi u noqon lahaayeen mid sii joogtaysma.

Anjanette iyo xubnaha kale la shaqaynayay waxa ay hadda ku howllan yihiin is-kaashiga odey-dhaqameeddada, shirkadaha xabkaha dhoofiya, iyo howl-wadenno dawladda ka tirsan in la habeeyo qaab joogtaysan oo aan dhibaato gaadhsiinayn dhirta. Waxana ay Somaliland ku soo laabanayaan bisha January 2017 si ay Hargeysa ugu qabtaan shir wada-tashi ah oo dhex mara daneeyeyaasha ganacsiga beeyada iyo mayddiga. Sidoo kale, waxa ay samayn doonaan kormeer kale oo ay ugu kuur gelayaan arrimahaas, isla markaana ay filin ka duubi doonaan.

## Deeqaha

Bishii Oktoobar, shirkadda **Boswellness** waxa ay Keydka Kala-Duwanaansha Noolaha (*Biodiversity Museum*) ee lagu daraaseeyo dhiroonka Somaliland, ee ku dhex yaalla Jaamacadda Hargeysa ugu deeday $ 10,000. Aad iyo aad baannu ugu mahad celinaynaa *Boswellness* deeqdaas ay SBF ku taageereen in ay yoolkeeda gaadho. Dhaqaalahaasi waxa uu noo suuragelinayaa in aannu iibsanno qalab aan looga maarmaynin kaydinta habboon ee dhiroonka, iyo agab kale. Sidoo kale, waxa ay noo oggolaanaysaa in aannu qoranno qof aqoon u leh dhiroonka lagu soo ururinayo xarunta. Ka sokow dhiroonka, waxa aannu ku talo jirnaa in aannu cayayaanka qaarkoodna muunado ka ururinno.

---


Bishii Ogost, **Mark Gabel**, dhir-aqoon ka soo jeeda gobolka Koonfurta Dhakoota ee carriga Maraykanka, ayaa hay'adda SBF ugu deegay $ 500. Waxa uu Mark ku caan yahay xeel-dheeridiisa aqooneed ee dhiroonka, iyo in uu yahay bare heersare ah. Aggolaanshihiisa kaddib, waxa dhaqaalahaas loo adeegsan doonaa kharashyada raaci doona soo ururinta dhiroonka, waxana ay ka qayb qaadan doontaa koboca Xarunta Kaydhka Kala-Duwanaanshaha Noolaha.

---

Kharashka joogtada ah hay'adda iyo waxyaabihii la soo iibiyay ee 2015-2016 waxa daboolay qof deeq-bixiye ah. Waxana uu isla markaa ballan qaaday in uu sii wado deeqdaas sannada 2017ka. Kharashka joogtada ah waxa ku jira lacagta diiwaan-gelinta ee hay'adda ee Somaliland iyo qaar ka mid ah gobollada Maraykanka. 2017ka, hay'adda waxa laga diiwaan gelin doonaa gobollada Minnesota, New York, Utah, Vermont, iyo Washington ee carriga Maraykanka.

# Barasho Aqoonyahan ku Xeel Dheer Xamaaratada

**Tomas Mazuch**, tan iyo yaraantiisii, waxa xiise gelin jiray noolaha berri-biyoodka (*amphibians)*, xamaaratada (*reptiles)* iyo adhax-laaweyaasha (*invertebrates)*. Hadda waxa uu ku sugan yahay Dugsi laga barto caafimaadka xawayaanka la soo xero gashado (*domestic animals*) halkaas oo cilmi-baadhis ku saabsan xamaaratooyinka iyo berri-biyoodka ka wado. Si gaar ah waxa uu sii daneeyaa qorratooyinka/goodaaddooyinka (*Hemidactylus*) Bariga Afrika, iyo weliba Daba-Aleelaalaha *(scorpions*), iyo weliba geed-gaabka biyaha dhexda/ caleemaha ku keydsada (*Stapliad plants - Apocynaceae*), iyo dacar yaryarta (*Aloe* (*Asphodelaceae*) Geeska Afrika.




Tomas Mazuch waxa uu qoray ama cid kale la qoray dhowr qoraal oo cilmi ah oo ku saabsan xamaaratada/berri-biyoodka, daba-aleelaalaha, iyo deris-ku-nooleyaasha. Intaas waxa dheer in uu abuuray bog *Facebook* ah oo magaciisu yahay *Nature of the Horn of Africa*, halkaas oo dadka arrimahan xiiseeya uu kula wadaago muuqaallo ku saabsan noolaha Geeska Afrika, waxana uu daabacay buug wata muuqaallo qurxoon oo magaciisa la yidhaahdo *Amphibians and Reptiles of Somaliland and Eastern Ethiopia*. Qaar ka mid ah muuqaalladaas iyo faallooyinkiisa, oo la oggolaansho aannu uga helnay ayaa ku guda jira, OpenZooMuseum and OpenHerbarium.

# Xarunta Keydka Kala-Duwanaanshaha Noolaha oo Bilaawday Howlaheedii



In Somaliland laga unko Keydka Kala-Duwanaanshaha Noolaha ayaa ahaa mudnaanta koowaad ee hay'adda SBF. Hadda howsheeduna si fiican ayay u socotaa. Gu'gii 2015, ayaa Jaamacadda Hargeysa ay barnaamajkan u fidisay qol, qalab xafiis iyo internet. Laga soo bilaabo xilligaas, SBF waxa ay ku soo kordhisay agabkii keydka dhiroonka lagaga shaqaynayay – haddii ay yihiin weyneysooyin (*microscopes),* Hage-steeyeyaal (*GPS*), kamarooyin, buugaag, miisas iyo kabad u gaar keydinta muunadaha dhirta. Sidoo kale, howshan si dadban, waxa gacan uga geysatay hay'adda Candlelight. Dhaqaale ka yimid shirkadda Boswellness dhammaadkii 2016 ayaa suurto gelin kara in howlaha la sii dardar geliyo.



Bishii Oktoobar, waxa raynrayn noo ahayd in aan Hargeysa kula kulanno xeel-dheereyaal dhinaca aqoonta dhiroonka, oo raba in ay ka qayb qaataan habsami-u-socoka howlaha Keydka Kala-Duwanaanshaha Noolaha.



Waxa qorshaha noogu jira laba waxqabad oo yaryar. Mid waa diiwaan-gelinta, sumadaynta dhirta ku guda taalla Jaamacadda. Ka kalena waa dhisitaanka macluumaad "*online*" ah oo ku saabsan dhirta carriga Soomaalida ka baxda iyo magacyadooda cilmiga ah. Waxa kale oo aannu dadaalkayga ku xoominaynaa joogtayna Keydka Kala-Duwanaanshaha Noolaha – haddii ay tahay shaqaale aqoon u leh oo ka howl gala xarunta iyo haddii ay tahay baahiyaha kale ee lama-huraanka u ah howl-gelinta xarunta.

# Qurxinta iyo Dhiraynta Jaamacadda Hargeysa



Sannadkii 2016, maamulka Jaamacadda Hargeysa waxa uu ku tallaabsaday waxqabad weyn oo la xidhiidha dhiraynta iyo qurxinta Jaamacadda. Goosiguna (*outcome)* waa wax muuqda oo la taaban karo oo cid kasta oo soo booqataa arki karto. Tallaabooyinkii u horreeyay ee dhinacaas loo qaaday waxa ay ahaayeen in taangi biyood oo dhiraynta u gaar ah la sameeyo, isla markaana riyihii Jaamacadda gudaheeda dhex saqaafi jiray si kama-dambays ah looga saaro. Waxa kale oo la sameeyay wadiiqooyin sibidhaysan, iyo dhiroonkii oo isugu jira caws, ubaxyo iyo dhirba lagu beero. Kuraas ay ardayda, shaqaalaha iyo dadka soo booqdaa ku fadhiistaan, ku sheekaystaan, isla markaana ku naalloodaan raadaynta qurxeed, iyo neecawda ka baxaysa dhirta. Dheefaha laga helayaa qurxintan intaas uun kuma joogto: Daawashada iyo la-fal-galka dabiicadda waxa ay qortaa ama fiiqdaa dareenka iyo maan-kaashiga dadka. Somaliland Biodiversity Foundation aad ayay maamulka Jaamacadda Hargeysa ugu bogaadinaysaa in ay Jaamacadda gudaheeda ka dhigaan meel bilicsan, waxana ay ardayda ku dhiirri gelinaysaa in ay ku beer-raqaan quruxdaas, isla markaana dhiroonka wax ka bartaan.

## Qaar ka mid ah dhiroonka Jaamacadda




Tallaabada ugu mudan ee cilmi-baadhista dhiroonka waxa ay tahay in si qudh iyo maan ah loo garto, ama loo asteeyo dhirta. Dhirta Jaamacadda ku taal waxa loo adeegsan karaa wax-barasho ahaan – siiba sida loo garan karo magaca iyo haybta geed dhirtaas ka mid ah, iyo in astaamaha u gaarka ah. Si ay arrintani ardayda ugu fududaato, waxa ay SBF bilowday in ay diyaariso tabeellooyin yaryar oo bir ka samaysan, isla markaana sita magaca Afsoomaaliga ah ee geedka iyo magaciisa cilmiga ah, isla markaana muunad ka mid ah la dhigo Keydka Kala-Duwanaanshaha Noolaha ee Jaamacadda. Muuqaallo iyo faahfaahinta dhammaan dhirtaas waxa lagu rari doonaa ama la geli doonaa degellka OpenHerbarium. Muuqaalka dhinaca bidix saarani waa geedxayaab jaadkiisu yahay *Pergularia daemia*, ka baxay irridda Keydka Kala-Duwanaanshaha Noolaha. Waana jaad ka tirsan bah-dhireedka *Apocynaceae*, kana sii ah *Asclepioideae.* Waxa jira 85 jaad oo ka tirsan qoys-dhireedkan oo laga heli karo Somaliland, iyo 55 kale oo laga heli karo Soomaaliya.

# Wararka Kala-Duwanaanshaha Noolaha


Somaliland Biodivesity Foundation waxa ka go'an in ay sameeyaan kayd loo adeegsan karo ama kaabi kara aqoonta la xidhiidha dhiroonka, xayawaanka iyo nooleyaasha ee laga heli karo Somaliland iyo gobolka ku xeeran. SBF waxa la dhisay 2015kii. Inta badan gu'gii hore waxa lagu qaatay isu-diyaarinta howlaha timaaddada.

## Dacar-Cas: Ma Noqon Kartaa Jaad Cusub oo aan Hore loo Diiwaan Gelin ?



Gu'gii 2014, Guddoomiyaha SBF, **Axmed Ibraahin Cawaale** ayaa ku hakaday jaad ka mid ah dacarta oo loo yaqaan "Dacar-cas", oo uu ka helay goob u dhow tuulada Alaala-cadka – taas oo ka geddisan dacaraha kale. Degaankaas waxa looga yaqaannaa "Dacar-Cas". Bishii Oktoobar, 2016, ayaa Axmed oo ay weheliyaan **Abdiqani Saleebaan** oo a tirsan hay'adda Candlelight, iyo **Mary Barkworth** oo ah Xoghayaha SBF ay mar kale booqdeen goobtaas. Kaddib markii ay u caddaatay in geedkaasi ka duwan yahay dhammaan jaadka ku xusan diiwaanka the **Flora of Somalia,** ayaa ay muuqaallo u direen **John Lavronas** (qoraaga *Aloe in the Flora*), iyo weliba aqoonyahanno kale oo ku xeel dheer dhiroonka carriga Soomaalida. Dhammaantood waxa ay isla aqoonsadeen in dacartaasi laba uun midkood noqon karto: Iska-dhal laba dacarood oo kala jaad ah, iyo in ay tahay mid cusub oo aan hore loo aqoonsan. Cawaale iyo jaleyaashiisu waxa ay dhowrayaan in dacartu ubxiso kaddib xilli-roobaad wanaagsan, si ay u ogaadaan bal in ay abuur (midho) bixiso iyo in kale. Waxa kale oo u qorshaysan in ay ardayda Jaamacadda ka qayb geliyaan cilmi-baadhistan – siiba sida dacartani u Taranto.

## Keligii Noole



***Keligii Noole "Parthenium hysterophorus"*** waa harame ka soo jeeda Koonfurta Ameerika, ha yeeshee iminka geedxun (*noxious)* ku noqday dhulka qarfaha iyo qarfe-u-ekaha ah ee kulaaleyaasha, oo ay ka mid tahay Somaliland iyo dalalka la deriska ahi. Dhibaatooyinkiisa waxa ka mid ah in uu dadka ku keeno xanuuno maqaarka ah, iyo qaar hab-neefsiga ah. Caanaha xoolaha waa uu gadhaadheeyaa, waxana uu is-hor taagaa habka bacriminta dalagyada sida yaanyada iyo digirta. Geedka keliya ahi waxa uu bixiyaa 10-20,000+ oo iniinyo si fudud u fidi kara – haddii ay yihiin gaadiid, dabay, dad iyo xoolo. Geedgaabkani kuma xusan diiwaanka **The Flora of Somalia**. Siyaabaha hadda lagu xakaymayn karaa waa yaryihiin, se rujinta, ka hor inta aanu abuur bixinin, iyo la-socod, maxaa yeelay, midhihiisu waa qaar bixi kara jeer ay dhowr gu' kasoo wareegaan.

## Geedxun Faafaya?



**Axmed Awale** waxa kale oo uu helay geed kale oo aan ka ag dheerayn degaankii laga helay Dacar-Caska (kor lagu soo tilmaamay) oo ku cusub goobtaas. Kaddib waxa lagu asteeyay **geel-Fijis** (*Senna baccarinii).* Wixii Axmed dareen geliyay ayaa ahaa, in dhirta uu arkay oo midkooda ugu dheeri 3 mitir ahaa, aanay ka muuqan raad daaqitaan, iyada oo xilliguna abaar ahaa, dhirtaasina cagaar ahayd. Waa weyddiin mudan in erecycelin loo helo bal in geedkan aanay xooluhu daaqini sii fidayo iyo in kale? Haa sidaas ayay u egtahay, se sida keliya ee loo ogaan karaa waa iyada oo la diiwaan geliyo dhirtan tiro ahaan, isla markaana lala socodo. Sidoo kale, waan in aan loo adeegsan geed-qurxeed magaalo, sida talooyin qoran hore loogu bixiyay, ka hor inta aan la ogaan geddiisa (dabeecaddiisa).



## Xog-Wadaagid

Beryahan dambe, is-weydaarsiga xogaha cilmi-saynas waxa ay ku sii badanayaan mareegaha internetka *(www)*. Wadaajinta xoguhu waxa ay xoojinaysaa qaayaha dadaallada qofeed ama keli-keli, iyo weliba in cidda rabta in ay go'aan ka qaataan talo ku dhisan xog-ogaalnimo ay adeegsan karaan. Waxana loo baahan yahay in xogahaas loo ururiyo qaab la jaan qaadsan halbeegyada caalamiga ah. Haddaba Somaliland Biodiversity Foundation waxa ay xogaha ay diyaariso kula wadaagi kartaa ciddii danaynaysa labadan degel Open-Herbarium iyo OpenZooMuseum. Degelladaas waa qaar dhowaan la dhisay. Waxana ay noqon doonaan qaar leh xogo wax laga dheefo kolka si la mid ah ay dadkuna wax ku biirshaan.

## Waannu u Baahannahay Is-barbar-taaggiinna

Sannadka 2017, SBF waxa ay ku talo jirtaa in ay ballaadhiso Keydka Kala-Duwanaansha Noolaha si loogu daro cayayaanka, sidoo kalena qabanqaabiso kulan-howleedyo la xidhiidha asteynta dhirta iyo cayayaanka, ardaydana ka qayb geliso cilmi-baadhista iyo howlaha fidinta.



Sidaas waxa aannu awoodi karnaa uun kolka aannu helno kaalmadiinna! Fadlan xubin ka noqo ururka, nagu gacan sii in aannu iibsanno qalab, awoodna u helno gudbin wax-barasho iyo cilmi-baadhis la xidhiidha dhirta iyo cayayaanka.

Degelka hay'adda, http://www.somalilandbiodiversity.org, ayaa kugu hagaysa sidii aad xubin u noqon lahayd, isla markaana aad qaadhaankaaga u bixin lahayd, haddii kalena nagala soo xidhiidh cinwaanka hoos ku qoran.

Qalabka aannu u baahannahay waxa ka mid ah: qalab naga gacan siin kara ururinta muunado la engejiyay ee dhiroonka iyo cayayaanka, weyneysooyin (*microscopes),* kamarooyin, agab wax lagu keydiyo, iyo baabuur loo adeegsado socdaallada dibedda ee dalka gudihiisa ah.

## Wax-ku-darsigaaga Ka Yeel Mid Muuqan Kara

Ma rabtaa in taageeradaada ay Hay'adda ku bixiso ay muuqan karto? Fadalna iibso alaab wadata astaanta hay'adda oo aad ka heli karto degelka Zazzle (www.zazle.com/ somalilandbiofdn) oo ay dhistay Sandy Long. Dheefta ka soo xeroota waxa heli doonta hay'adda.

## Nagala Soo Xidhiidh


Web Site: http://somalilandbiodiversity.org

Email: somalilandspeciesobservations@gmail.com

Mailing Address:

Somaliland Biodiversity Foundation

397 Lauralin Drive